



JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

DOORASHADA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA

GUDDOOMIYAHA IYO GUDDOOMIYE

KU-XIGEENNADA 1AAD IYO 2AAD

Muqdisho, 27 – 28 Abriil 2022

GOLAHA SHACABKA:

- Markuu Arkay:

Qodobka 65(4) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Arkay:

Qodobka 13(8)(9)(11) ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;
- Markuu Arkay:

Taariikh Nololeedka Murashaxiinta u tartamaya qabashada Xilka Guddoonka Golaha Shacabka (Guddoomiyaha, Guddoomiye Ku-xigeennada 1aad iyo 2aad).

WUXUU GUDDOONSADAY SIDA HALKAN HOOSE KU XUSAN:

Qodobka 1aad:
Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Todoba (7) Murashax waxaana goobjoog ahaa oo codeynayey 252 Xildhibaan. Natiijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	0	252	252
2-aad	0	252	252

Lr.	Magac	Wareegga 1aad	Wareegga 2aad
1.	Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur “Madoobe”	74 (29%)	163 (64.7%)
2.	Xil. Xasan Cabdi Nuur	98 (38.8%)	89 (35.3%)
3.	Xil. Cabdullaahi Aadan Axmed “Black”	33 (13%)	-
4.	Xil. Adan Maxamed Nuur “Saransoor”	23 (9.12%)	-
5.	Xil. Shariif Maxamed Cabdullaahi	13 (5.15%)	-
6.	Xil. Cabdirashid Maxamed Xidig	6 (2.3%)	-
7.	Xil. Saadaq Cabdullahi Cabdi	5 (1.98%)	-

Inta aan la gudagelin wareegga 2aad waxaa iskood uga tanaasulay Xil. Cabdullahi Aadan Maxamed “Black” iyo Xil. Aadan Maxamed Nuur “Saransoor” oo xaq u lahaa iney tartamaan. Saa daraadeed waxaa loo gudbay wareegga 2aad maadaama ay isku soo hareen laba murashax kaliya.

Fiiro gaar ah: Murashax Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur “Madoobe” ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya maadaama uu helay cododkii loo baahnaa wareegga 2aad oo ah (50%+1) iyo dheeraad tirada guud ee xildhibaanada coddeyneysay.

Qodobka 2aad:
Doorashada Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka

Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Toban (10) Murashax waxaana goobjoog ahaa oo codeynayey 241 xildhibaan. Natiijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	0	241	241
2-aad	0	241	241

#	Magaca Murashaxa	Wareegga 1-aad	Wareegga 2-aad
1.	Xil. Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar	52 (21.57%)	137 (56.84%)
2.	Xil. Maxamed Cali Cumar “Caananuug”	58 (24%)	104 (43%)
3.	Xil. Maxamed Weli Cabdalla Axmed	59 (24.48%)	-
4.	Xil. Khadija Maxamed Diiriye	21 (8.7%)	-
5.	Xil. Cabdikariin Cabdow Xaydar	15 (6.22%)	-
6.	Xil. Maxamud Cabduqaadir Xaaji “Jeego”	12 (4.97%)	-
7.	Xil. Cabdiraxmaan Cabduqaadir Cadde	8 (3.3%)	-
8.	Xil. Saciid Maxamed Maxamuud Xeyd	7 (2.9%)	-
9.	Xil. Maxamed Nuur Abuubakar	5 (2%)	-
10.	Xil. Maxamed Cumar Ceymoy	4 (1.65%)	-

Inta aan la gudagelin wareegga 2aad waxaa iskood uga tanaasulay Xil. Maxamed Weli Cabdalla Axmed iyo Xil. Khadiija Maxamed Diiriye oo xaq u lahaa iney tartamaan. Saa daraadeed waxaa loo gudbay wareegga 2aad maadaama ay isku soo haren laba murashax kaliya.

Fiiro gaar ah, Murashax Xil. Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya maadaama ay heshay cododkii loo baahnaa wareegga 2aad oo ah (50%+1) iyo dheeraad tirada guud ee xildhibaanada coddeyneysay.

Qodobka 3aad:
Doorashada Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka

Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya waxaa ku tartamay Toban (10) Murashax waxaana goobjoog ahaa oo codeynayey 241 xildhibaan. Natijada Doorashada waxay noqotay sida ku muuqaalisan shaxdan:

Wareegga	Cododka xumaaday	Cododka ansaxay	Wadarta Guud
1-aad	0	241	241
2-aad	0	241	241

#	Magaca Musharraxa	Wareegga 1-aad	Wareegga 2-aad
1.	Xil. Cabdullahi Cumar Abshir “Abshirow”	43 (17.84%)	146 (60.58%)
2.	Xil. Mahad Cabdalle Cawad	87 (36%)	95 (39.41%)
3.	Xil. Saciid Maxamed Cali	38 (15.76)	-
4.	Xil. Ayuub Ismaaciil Yusuf	24 (9.95%)	-
5.	Xil. Maxamed Xuseen Abuukar “Garaxo”	24 (9.95%)	-
6.	Xil. Asad Cabduqaadir Maxamed	18 (7.46%)	-
7.	Xil. Dr. Axmed Aadan Axmed	7 (2.90%)	-

Inta aan la gudagelin wareegga 2aad waxaa iskood ugu tanaasulay Xil. Saciid Maxamed Cali, Xil. Ayuub Ismaaciil Yuusuf iyo Xil. Maxamed Xuseen Abuukar “Garaaxo” oo xaq u lahaa iney tartamaan. Saa daraadeed waxaa loo gudbay wareegga 2aad maadaama ay isku soo haren laba murashax kaliya.

Fiiro gaar ah, Murashax Xil. Cabdullahi Cumar Abshir “Abshirow” ayaa ku guuleystay Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad maadaama uu helay cododkii loo baahnaa wareegga 2aad oo ah (50%+1) iyo dheeraad tirada guud ee xildhibaanada coddeyneysay.

Qodobka 4ad:
Guddoonka Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad

Xil. Sh. Adan Maxamed Nur “Madoobe”	Guddoomiyaha Golaha Shacabka
Xil. Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar	Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad
Xil. Cabdullahi Cumar Abshir “Abshirow”	Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad

Waxaa saxiixay

Tix: GSH/B-11/001/22
Kalfadhiga: 1aad
Kulankiisa: 4aad iyo 5aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

Taariikh: 27 – 28 Abriil 2022

M.ne Cabdikariin Xaaji Cabdi Buux
Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
Doorashada

Xil Cabdirisaaq Cumar Maxamed
Guddoomiyaha Guddiga

Xil. Cabdisalaam Xaaji Axmed Liibaan "Dhabancad"
Guddoomiyaha KMG ee Golaha Shacabka

